zebra

Child & Youth Advocacy Centre

Xaruunta u doodista Ciyaalka & Dhalinyarada

# hagaha daryeelayaasha

# hagaha **daryeelayaasha**

Ku soo dhawoow Xaruunta u doodista Ciyaalka & Dhalinyarada ee Zebra. Imaanshaha halkani maanta waa tallaabo loo qaaday waddada loo marayo soo celinta rajada iyo amniga. Waxaan halkaan u joognaa hubinta in danta ubadkaagu ay ahaato mudnaanta koowaad ee qof walba.

## **Xog** muhiim ah iyo nambarada taleefanada

Boggan waxa ku jira magacyada dadka aad la xidhiidho kuwaas oo diyaar u ah in ay ku saacidaan iyo in ay si qarsoodi ah kaaga jawaaban su'aal kasta oo aad qabtid.

Saacadaha shaqadayadu waa Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo 8 subaxnimo ilaa 8 galabnimo.

**Si aad ulaxidhiidho Xaruunta u doodista Ciyaalka & Dhalinyarada ee Zebr:**
Wac: 780.421.2359
Iimayl: info@zebracentre.ca
zebracentre.ca

**Su'aalaha ku saabsan barnaamijyada taageerada ee u diyaarsan adiga iyo ilmahaaga:**
U doodayaashayada ubadku way ku farxi doonaan inay ku caawiyaan.
Waxaad ka heli kartaa iyaga 780.421.2359

**Su'aalaha ku saabsan baadhitaankaaga:**
Baadhaha loo xilsaaray kiiska ilmahaagu waa: ________________________

Nambarka galkaaga booliisku waa:_________________________________

# Meel ay **Ciyaalku wax sheegi karaan**

**Ilmo walba qiso ayuu leeyahay. Waa shaqadayada hadaanu nahay Xarunta u doodista Ciyaalka & Dhalinyarada ee Zebra in aanu dhegaysano.**

2002, ayaa naloo aasaasay baahi jirtay awgeed si loo abuuro hal meel oo nabdoon taas oo carruurtu awoodaan in ay wax ku sheegaan. Maanta, kooxdayada aadka utababarani waxay ka shaqeeyaan dhanka ahdaafta guud ee taageeridda carruurta iyo dhallinyarada la kulmay xadgudubyada iyo abuurista mustaqbal ilmo kasta la dhageysto.



# dhamaantayo waxaanu u joogna

# **si aanu kuu caawino**

**Marka ay khatartu soo baxdo, zebras waxay sameeyaan goobaabo ilaalin ah oo ku wareegsan dhallintooda.**

**Kooxdayada aadka utababarani waxay u shaqeeyaan si ay u ilaaliyaan carruurta sidoo kale.**

Annaga oo adeegsanayna xikmadaha wadajirka ah ee kooxdayada aadka utababaran, waxaanu siinaa dhiirigelin carruurta timaada Xaruntayada si ay noola wadaagaan qisooyinkooda. Inta lagu gudo jiro guud ahaan xog waraysiga, baadhista, garsoorka iyo habraaca bogsashada, Mudnaantayada

Koowaad ayaa had iyo jeer ahaan doonta danaha, amniga iyo raaxada ubadkaaga. Inta lagu jiro booqashadaada Xarunta u doodista Ciyaalka & Dhalinyarada ee Zebra, waxaa laga yaabaa inaad la kulanto shaqsiyaad ka socda ururada soo socda:

- Shaqaalaha Xarunta Zebra & Mutadawiciinta
- Qaybta Ilaalinta Ilmaha ee Adeegga Booliska Edmonton
- Kooxda Ka jawaabista Khataraha Ilmaha (CARRT)
- Adeegyada Carruurta iyo Qoyska ee Gobolka Edmonton
- Royal Canadian Mounted Police
- Adeegyada Xeer Ilaalinta ee Alberta Crown
- Xirfadlayaasha caafimaadka guud iyo caafimaadka dhimirka ee goobta ka baxsan



# ku hareeraynta ilmahaaga **taageero**

**Imaatinka Xarunta u doodista Ciyaalka & Dhalinyarada ee Zebra waxay ahayd talaabadaadii ugu horaysay ee dib u soo celinta rajada iyo amniga.**

Waxaa naga go'an inaan kugu hareereyno taageero iyo u doodida danta ubadkaaga. Waxaan aqoonsannahay in aysan laba carruur ahi isku mid ahayn oo kiis kastaa u qalmo hab gaar ah oo ku habboon. Taasi waa sababta aan ula shaqayno shuraakadayada si aan u samayno qorshe ay ku jiraan adeegyada taageerada ee soo socda:
**Barnaamijka Weheshiga Eyda ee muhiimka ah** - Waxaanu shaqaaleysiinaa saddex ey oo tababaran kuwaas oo laga yaabo in ay diyaar u yihiin inay siiyaan raaxo iyo taageero ilmahaaga gudaha Xaruuntayada iyo Maxkamadaha Sharciga Edmonton.

**Barnaamijka Gudbinta Dhaawaca** - Waxaan ku xidhi doonaa ilmahaaga noocyo kala duwan oo latalineed iyo xirfadlayaasha kaalmaynta dhaawacyada ee bulshada dhexdeeda.

**Barnaamijka Udiyaar garowga Maxkamadda** - Haddii kiiska ilmahaagu u gudbo maxkamadda, waxaanu ku martiqaadi doonaa ilmahaaga inuu ka qayb qaato barnaamijka udiyaar garowga maxkamadda - tallaabo muhiim ah oo la xidhiidha ka jahli bixinta khuraafaad kasta ama cabsi kasta oo ay ka qabaan habka garsoorka.

**Wehel-yeelida Maxkamadda**- Waxaanu ku siin doonaa taageero adiga iyo ilmahaagaba marka lagu gudo jiro nidaamka cadaalada dembiyada iyo ka caawinta gelitaanka xaruumaha ciyaalka-uroon ee Maxkamadaha Sharciga Edmonton haddii ilmahaaga looga baahan yahay inuu markhaati furo.

# ilmahaaga **bogsashadiisa**

**Mid ka mid ah waxyaabaha ugu wanaagsan ee aad u qaban karto ilmahaaga waa inaad u sheegto inaad jeceshahay iyaga, aaminsantahay sidoo kalena aad ku faanto sida ay daaha uga qaadeen qisadooda. Tan ugu muhiimsan, waxay u baahan yihiin inay ogaadaan inaysan iyagu wax khalad ah samaynin.**

Fahamka dareenka iyo dabeecadaha ilmahaagu waa tallaabo muhiim u ah ku hagistooda habraaca bogsashada. Qofna kaa ma yaqaan ilmahaaga, laakiin hoos waxa ku xusan qaar ka mid ah dabeecadaha laga yaabo in ilmahaagu la kulmo:

- Dabeecadaha dib-u-noqodka (shilalka musqulaha ka dib tababarka xaajo gudashada musqusha, nuugista suulka, dib u la soo noqoshada caruusadaha isagoo ilmo weyn ah)
- Dhibaatooyinka hurdada (carruurtu badanaa waxay qabaan cabsi ka hor wakhtiga jiifka, gaar ahaan
  haddii horre xadgudub kaga dhacay qolalka jiifka)
- Isku kalsoonaan hoosaysa
- Ka digtoonaanshaha taabashada jirka dadka waaweyn
- Welwelka kala soocida marka laga reebo daryeelayaasha aasaasiga ah
- Dabeecadaha xad dhaafka ah sida xanaaqa ama ka goosashada
- Dib-u-xasuusashada ama dhaawacyada loo arko sameynta meel u xasiloon carruurta yaryar
- Riyo qarow oo ku saabsan mowduucyo isku mid ah sida ( wuxuushta, dadka cabsida leh, iwm.)
- Walwalka waxaa badanaa laga soo sheegaa calool xanuun, ama madax xanuun
- Awood la'aanta la heshiinta asaagii
- Isku dhex yaaca (waxay u eg tahay dhibaatooyinka u fiirsashada carruurta ama kala fogaanshaha)
- Dabeecadaha galmada ku sababaan ee ilmaha oo macno u samaynaya wixii ay la kulmeen

- Walaaca guud (ilmaha ayaa laga yaabaa inuu ka baqo hal shay laakiin way noqon kartaa guud ahaan waxyaabo badan)
- Ka cararida ama ka maqnaanshaha dugsiga walaac ama cagajugleyn awgeed
- Dhibaatooyinka rabitaanka cuntada (ilmaha ayaa bilaabaya in uu wax cuno ama ay wax cunidiisu yaraato si sababa la xidhiidha dareen xad dhaaf ah
- Dabeecadaha is-waxyeelaynta (madax gidaar ku garaaca, qolof-qaadista, is goynta)
- Xirashada dhar aan ku habboonayn xilliga

(xidhashada dhar culus wakhtiga xagaaga)

Ma jiraan laba carruur ah oo si isku mid ah u soo gaaro dhaawac. Fadlan ha ka waaban inaad lana soo xiriirto annaga haddii aad jeclaan lahayd inaad ka hadasho dhaqan kasta oo adiga ku khuseeya.

Macluumaadka ay bixiso Xarunta Xadgudubka Galmada ee Edmonton (SACE).

# adiga **bogsashadaada**

**Waxaad door muhiim ah ka ciyaartaa bogsashada ilmahaaga, laakiin fadlan ha ha iloobin hubinta ladnaantaada.**

Xadgudubku wuxuu saameyn karaa dhammaan nidaamka taageerada waxaana leenahay shabakado si loo hubiyo in qof walba uu helo taageero. Haddii aad u baahan tahay Caawimaad, waan kula xiriirin karnaa adeegyada la talinta bulshada kuwaas oo dabooli kara baahiyahaaga gaarka ah.



# dhamaan noocyada su'aalaha
# dhamaan noocyada jawaabaha

**Wax kasta oo su'aalo ah oo aad qabtid, waxaan ku dadaali doonaa inaan kaaga jawaabno.**

- Maxaan ku idhaahdaa ilmahayga?
- Sideen ugu adkaysan karaa ilmahayga?
- Ma kala hadli karaa ilmahayga waxa dhacay?
- Miyaan filan karaa isbeddel ku yimaada hab-dhaqanka ilmahayga?
- Ilmahaygu ma u baahan yihiin la-taliye?
- Ma jirtaa taageero dhaqaale oo la heli karo si loo caawiyo ilmahayga?
- Maxaan ku idhaahdaa carruurtayda kale?
- Maxaan u sheegaa xubnaha kale ee qoyskayga?
- Miyaan u sheegaa dugsiga ilmahayga?
- Maxay tahay ujeedada duubista wareysigu iyo halkee ku noqon doonaa duubistani
- Ilaa intee ayay baadhistu soconaysa
- Intee in le'eg ayay maxkamaddu socotaa
- Ilmahaygu ma u baahan doonaa inuu ka marag furo maxkamadda



# tallaabada **xigta**

**Ka dib booqashadaada ugu horreysa ee Xaruunta u doodista Ciyaalka & Dhalinyarada ee Zebra, waxaanu bilaabi doonaa inaanu horumarino qorshaha daryeelka gaarka ah ee ilmahaaga.**

Marka laga soo tago barnaamijyadayada taageerada, fadlan wakhti sii ka fiirsashada in lagaa caawiyo adeegyadan:

- Waxaan qabanqaabin karnaa wicitaanno daryeel oo joogto ah si aan u bixinno taageero, guud ahaana kaaga warbixino xaaladda kiiskaaga sidoo kalena hubino in lagaaga jawaabo su'aalahaaga.
- Waxaan kaa caawin karnaa jadwalka gaadiidka ee socdaalkaaga xaruunta u doodista Ciyaala & Dhalinyara wakhtiga balamaha ama taariikhaha maxkamada.
- Waxaan kaa caawin karnaa codsashada kaalmo maaliyadeed iyada oo loo marayo waaxda Faa'iidooyinka Dhaqaalaha ee Dhibanayaasha Dembiyada.
- Waxaan kaa caawin karnaa qorista iyo buuxinta Bayaanada Saamaynta Dhibanaha.

**Haddii ay jiraan adeegyo dheeraad ah oo aad u malaynayso inaan kaa caawin karno, fadlan ha ka waaban inaad nala soo xidhiidho.**

# qoraalo

7th floor, 10909 Jasper Avenue
Edmonton, AB, T5J 3L9
780-421-2385
info@zebracentre.ca

**zebracentre.ca**

**#kidscantell**